

Ipsos GmbH · Industriestraße 22 · 21493 Schwarzenbek

Zugangscode (ID):



Hamburg, der 14.07.2025

Dib u dejin: Xaaladaha nolasha ee Jarmalka

Gacaliye ka qaybgale

Waxaan jeclaan lahayn inaan si kal iyo laab ah ah kuugu casuuno inaad ka qaybqaadato 'Dib u dejin: Xaaladaha nolasha ee Jarmalka'. Waxay Online qaadanaasaa ilaa 30 daqiiqo. Dhammaanba ragga iyo dumarka Jarmalka ku yimid barnaamijka aqbalaadda, sida barnaamijka Dib u dajinta, ayaa waraaqdaan helaya. Waxaan jeclaan lahayn inaan wax kaa weydiino xaaladaada Jarmalka iyo sida aad ku heshay barnaamijka aqbalaadda ah. Cilmibaareyaasha University of Bielefeld iyo xarunta cilmibaarista ee Xafiiska Federaalka ee Socdaalka iyo Qaxootiga (Federal Agency of Migration and Refugees) ayaa samaynaya xog aruurintan. Machadka cilmibaarista Ipsos ayaa samaynaya xog aruurinta.

Maxay tahay sababta aan uga qaybqaadanayo?

Jawaabahaagu waxay cilmibaareyaasha ka caawinayaan inay ogaadaan waxa sida wanaagsan u shaqeeyay iyo meelaha dhibaatooyinku kajiraan. Aqoontaanu waxay gacan ka gaysanaysaa hagaajinta barnaamijka aqbalaada qaxootida iyo taageerada sidii ay si wanaagsan ugu dhexgali lahaayeen Jarmalka.

Waxaad heli doontaa 15€ oo boostada laguugu soo dirayo ayadoo Lagaaga Mahadcelinayo dadaalkaaga!

**Adiga laguugu tala
galay, mahadcelin
ahaan:
15€**

€15 qofkiiba hal mar la
siinayo.

Sidee ayaan uga qaybqaadan karaa?

Waxaad isticmaali kartaa koodhkaaga gelitaanka (ID) si aad uga qaybqaadato xog aruurinta hal mar. Laguuma ogola inaad koodhkaaga la wadaagto qof kale. Haddii dad badan oo qoyskaaga ah helaan waraaqda, xubin kasta oo hesha waxay ka qaybqaadan kartaa hal mar waxayna haysaa 15€.

Waxaad dooran kartaa mid kamid ah saddexda xulasho si aad uga qaybqaadato:



**Kusoo dir taleefoonka
moobeelka ah ama
taableet**



Interneetka

Geli lifaaqa:

[resettlement-
lebenssituation.ipsos.de/lp-so](https://resettlement-lebenssituation.ipsos.de/lp-so)

Kaddib, si aad xog aruurinta u
furto, Fadlan geli koodhkaaga
gelitaanka (ID):

Zugangscode/ID:



Taleefoonka

Qabso ballanta marka aad
jeceshahay inaan kusoo wacno.

- Webseedka (eeg qaybta danbe)
- Boostada waraaqda
- Naga soo wac:

[0800-1006720](tel:0800-1006720)

Ka qaybqaadashada daraasadaanu waa **mutadawacnimo**. Haddii aad ka qaybqaadato iyo haddii kale wax faa'iido ah ama faa'iido darro ah uma laha noloshaada Jarmalka. Marka la eego natiijooyinka xog aruurinta, waxaa muhiim ah in dadka ugu badan ee suurtagalka ah ka qaybqaadaan. **Ka qaybqaadashadaadu sidaas darteed waa wax tar muhiim ah.** Jawaabahaaga waxaa loo qiimaynayaa qaab qarsoodi ah. Su'aalaha qaarkood waa xasaasi. Haddii aad ka qaybqaadato, waxaad awood u leedahay inaad ka jawaabin su'aalaha waqti kasta.



Waa maxay sababta lagu xushay?

Waxaan casuunay dhammaan dadka, 18 sanno jirka ah iyo wixii kasii weyn ee Jarmalka yimid laga soo bilaabo 2016 ayagoo qaxooti ah kuna yimid Barnaamijka Dib u dajinta Federaalka ama Barnaamijka Aqbalaadda bili'aadantinimada ah ee Turkiga, inay xog aruurinta sameeyaan.



Sidee ayaan ku helnay ciwaankaaga?

Waxaan ciwaankaaga ka helnay Diiwaanka Dhexe ee muwaadiniinta Ajaanibta ah (AZR) ama wakaaladaha soogalootida, waxaan kaliya ugu isticmaalnay inaan kugu casuuno samaynta xog aruurinta.



Sidee ayaa xogtaada loo ilaalinayaa?

Ilaalinta xogtaadu waa xaquuqdaada sidaas darteedna waa mowduuc aad muhiim noogu ah. Wax kasta oo aad afka nooga sheegto ama noosoo qorto waxaan u tixgalinaynaa sidii macluumaad sir ah. Waxaan xogtaada u taxliilinaaynaa si qarsoodi ah. Dhammaanba shuruucda ilaalinta xogta waa la ilaalinayaa.

Waxaad macluumaadka saxda ah ee ku saabsan qaabka aan xogtaada u ilaalinayno ka helaynaa xaashida ilaalinta xogta ee waraaqdaan la socota. Waxada sidoo kale shuruucda ilaalinta xogta ka helaynaa <https://www.ipsos.com/de-de/resettlement-living-situation-germany-0>.



Halkee ayaan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?



**Ka eeg
websaytkeena:**

<https://www.ipsos.com/de-de/resettlement-living-situation-germany-0>



**Ama naga soo
wac:**

0800-1006720

Waxaad nala soo xiriiri kartaa inta u dhexaysa 9 subaxnimo iyo 4 galabnimo. Wicitaanku waa bilaash.



**Ama iimayl noogu
soo qor:**

de-resettlement2025@ipsos.com

Waad ku mahadsan tahay taageeradaada qiimaha badan ee aad u hayso daraasadaan muhiimka ah!

Dr. Robert Grimm

Madaxa Cilmibaarista
Arrimaha Bulshada Ipsos

Tatjana Baraulina

Agaasimaha
'Maamulka Socdaalka Caalamiga ah iyo
Soogalootiga' gaar ahaan qaybta
cilmibaarista
*Hay'ada Federaalka ee Socdaalka iyo
Qaxootiga*

Prof. Dr. Martin Kroh

Qaababka cilmibaarista bulshada ee
cilmiyaysan ayada oo diirada la saarayo
qaababka xisaabaadka ah
University of Bielefeld